

# Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeralayda Waaweyn (SFMNP)

## Su'aalaha Badanaa la Isweyddiiyo ee Kaarka Dheefaha

### Sida loo isticmaalo kaarkaaga dheefaha Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeralayda Waaweyn ee SFMNP

- U-keen kaarkaaga dheefaha ee SFMNP ama koodhkaaga [QR ee ku jira ablikehanka telefoonka gacanta ee SFMNP](#) suuqa [beeralaydaka-qaybgaleysabarnaamijka ama dukaankabeerta.](#)
- Dooroo waxsoosaarkaaga cusub ama malabka.
- Qofka beeralaya ah wuxuu iskaan-gareen dooncaa koodhkaaga QR isagoo adeegsanaya telefoonkiisa ama aalad gacanta lagu qaado.
- Xaqiji qaddarka iibkaaga ka-dibna geli PIN-kaaga 4ta lambar ka kooban\*.
- Qofka beeralaya ah wuxuu xaqijin dooncaa iibkaaga adigana waxaad heli doontaa dalagaaga, cusub ee degaanka ka baxay ama malab!



**PIN\*:** Kaararku waxay la yimaadaan PIN 4 lambar ka kooban oo u diyaarsan in la adeegsado. 4-ta lambar ee laguu qoondeeyay PIN wuxuu adeegsadaa labada lambar ee bisha aad dhalatey iyo labada lambar ee bisha sannadka aad dhalatey (MMYY). Tusaale: Maalinta dhalashada ee 4 luulyo, 1963 (07/04/1963) waxay isticmaali doontaa PIN ah 0763

### Su'aalaha Badanaa La Isweyddiiyo

Miyaan u baahanahay in aan hawlgeleyo kaarkeyga?	<p><b>Maya</b>, uma baahnid in aad hawgeliso kaarkaaga . Kaararka cusub ee hadda la bixiyay waxaa horey ugu jira lacag dhan \$80 oo dheef ah iyo PIN gaar ah oo isticmaala taariikhdaada dhalashada.</p>
Goormee ayaan Isticmaali karaa dheefahayga?	<p>Dheefahaaga SFMNP aya la isticmaali karaa laga bilaabo <b>1-da Juun ilaa 31-ka Oktoobar</b>. Fadlan ogow in dheefaha aaney u wareegin min sannad ilaa sannad . Dheefo kastoo aan la isticmaalin ee ku harsan kaarka lama isticmaali karo ka-dib 31-ka Oktoobar.</p>
Waa maxay PIN-keyga?	<p>Kaarkaaga SFMNP <b>wuxuu la yimaadaa PIN</b>. PIN-kaaga 4-lambar waa bisha aad dhalatey iyo sannadka. PIN tusaale ah: Maalinta dhalashada - 4 Luulyo, 1963, PIN: 0763. Wuxaa u baahan doontaa 4tan lambar si aad u xaqijiso waxyaabaha aad iibsatay.</p>
Miyaan beddeli karaa PIN-keyga?	<p>Haa, waxaad beddeli kartaa PIN-kaaga adigoo wacaya 1-844-359-3104. Si aad PIN-kaaga u beddesha, waxaad u baahan doontaa lambarka 16-lambarka ka kooban ee ku qoran kaarkaaga SFMNP, taariikhdaada dhalashada oo qaabkan ah (qaabka MMDDYYYY), iyo koodhkan sib ee degaankaaga. <b>Talo: dooro PIN aad si fudud ku xusuusan kartid, oo haku dul qorin PIN-kan kaarkaaga korkiisa.</b></p>
Maxaan ku iibsan karaa kaarkeyga dheefaha?	<p>Waxaad u isticmaali kartaa dheefahaaga in aad ku iibsato, malab, khudaar, miro degaanka ka baxay, cusub, nafaqo leh, oo aan diyaarsanayn iyodhirmarkaasi la soo jaray. <b>Uma</b> isticmaali kartid dheefahaaga SFMNP in aad ku iibsato miro la ama khudaar la qalajiyay, geedo la qalajiyay, dhirta khudaar ama miraha oo dheri ku beeran, geedo dheri ku beeran, ukummo, hilib, farmaajooyin, iyo cunto badeed.</p>
Halkee ayaan ku isticmaali karaa dheefahayga SFMNP?	<p>Ka eeg midkood calaamadaan suuqa signs beeraleyda ee ka qaygalaya. Liiska suuqyada beeralayda ee la oggol yahay iyo duukamada beeraha ayaan waxaa laga heli karaa halkan Ablikehanka <a href="#">telefoonka gacanta ee ee SFMNP</a> iyo barta internet-ka ee ka hooseysa "Halkee ayaan ku isticmaali karaa dheefahayga SFMNP?" ee <a href="#">seniorfmnp.com</a>.</p>



<b>Sideen u eegaa baaqigeyga?</b>	<p>Kaarkaaga dheefaha SFMNP wuxuu yeellan doonaa qiimaha bilowga dheefta oo dhan \$80. Waa kuwan siyaabo a few dhawr ah oo aad ku eegi karto baaqigaaga:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Soo-dagso ablikeeshanka <a href="#">telefoonka gacanta ee SFMNP oo la-soco baaqigaaga</a> adigoo adeegsanaya “Dheefahayga/My Benefits”.</li> <li>2. Wac lambarka telefoonka “baaqiga dheefaha” ee ku yaalla xagga dambe ee kaarkaaga SFMNP oo ah 1-844-359-3104. <b>Ogow:</b> Wacayaasha markii-koowaad soo wacay waxaa laga codsan doonna in ay sameystaan PIN. Waxaad u baahan doontaa in aad geliso lambarka kaarkaaga ee 16-tiro, taariikhda dhalashada (MMDDYYYY), iyo sib-ka koodhka si aad PIN-kaaga uga dhigto lambar kastoo 4-tir ah. Waxaad isticmaali kartaa PIN isku mid ah (MMYY) haddii aad doorbidayso, ama waxaad dooran kartaa in aad ku bedesho wax ka duwan.</li> <li>3. Ka hor inta aadan sameyn iibsi u qalma, beeralayda ka-qaybgalaysa waxay sidoo kale kaa caawin karaan eegista baaqiga dheeftaada.</li> </ol>
<b>Maxaan sameeyaa haddii aan heli karin beeralay aqbalaya dheefahayga?</b>	Haddii aadan arkin wax beeralay ah oo leh “Dheefaha Suuqa Beeralayda Halkan Ku Soo Dhawooow!” saxiix, ka-dibna aad “Waabka Macluumaadka” kaas oo is caadi ahaan ku yaalla bartamaha suuqa beeralayda. Qof kastoo halkaasi jooga wuxuu ku farxi doonaa in uu kaa caawiyo helidda beeralay aqballa dheefahaaga SFMNP.
<b>Maxaan sameeyaa haddii aan kaarkeyga iga lumo?</b>	Kaaraka lumay ama la xaday waxaa laga yaabaa in la beddelo. Fadlan la xiriir hay'adda maxaliga ee halka aad <a href="#">ka cadsatay</a> dheefaha SFMNP AMA wac lambarka adeegga macmiilka ee ah (1-800-841-1410) haddii aad qabto su'aalo ku saabsan hannaankan.
<b>Miyuu qof kale ii soo adeegi karaa isaga oo adeegsanaya kaarkan?</b>	<p>Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad si firfircoon uga qaybgasho adigoo adeegsanayo dheefahaaga in aad ku ku iibsato dalag cusub ama malab. Si kastaba ha ahaatee, if ma awoodid in aad si buuxda uga qaybgasho adigoo adeegsanaya dheefahaaga, waxaad u xilsaari kartaa wakiil wax kuu soo iibinaya oo adiga kaa wakiil ah. Fadlan buuxi oo saxiix foom oggolaansho si aad ugu xilsaarto wakiil (iskaan-garee koodhka QR si aad u hesho foomkan ama isticmaal cinwaanka mareegta hoose si aad u hesho luuqado kale oo dheeraad ah).</p> <p><a href="https://www.dshs.wa.gov/als/alt/home-and-community-services-publications/senior-farmers-market-nutrition-program-documents-translations">https://www.dshs.wa.gov/als/alt/home-and-community-services-publications/senior-farmers-market-nutrition-program-documents-translations</a></p>
<b>Ma in aan haystaa kaarkeyga ee sannadkii hore?</b>	Haddii aad lahayd a kaarka dheefaha SFMNP sannadkii 2023, fadlan si ammaan ah uga takhalus ama u tuur. Kaar cusub ayaa lagu siin doonaa sannadka 2024. Fadlan hayso kaarkaaga cusub ee 2024 maadaama la adeegsan karo sannadka xiga.
<b>Miyaan u baahanahay kombiyuutar ama telefoon casri ah?</b>	Maya, waxaad kaliya u baahan tahay koodhka QR ee kaarkaaga dheefaha SFMNP iyo PIN si aad wax u iibsato! Lagaagama baahna in aad haysato telefoon casri ah ama kombiyuutar si aad u isticmaasho dheefahaaga.
<b>Sideen ku helaa Ablikeeshanka Telefoonka Gacanta ee SFMNP oo muxuu sameeyaa?</b>	Haddii aad haysato telefoon casri ah ama aalad la mid ah sida iPad ama tablet la mid ah, waxaad soo-degsan kartaa ablikeeshanka telefoonka gacanta oo kaliya loogu talagalay dheefaha SFMNP. Markaad hesho have kaarkaaga dheefaha SFMNP, waxaad soo degsan kartaa oo aad adeegsan kartaa ablikeeshankaaga SFMNP si aad u eegto baaqiga dheefahaaga, hel suuqyada maxalliga ah, eeg taariikhda iibkaaga , ama hel macluumaad dheeraad ah iyo taageero. Eeg warqadda ku daabacan xogta Ablikeeshanka telefoonka <a href="#">gacanta ee SFMNP</a> .
	 
	<b>Aaladaha Apple</b> <b>Aaladaha Android</b>